**XAASHI MURTIYEEDKA U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA**

# SIDA LOOGU DIYAAR GAROOBO DUUFAAN JIILAALEEDKA

Maaraynta Gurmadka iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin waxay bixisay xogta soo socota oo ku saabsan duufaan jiilaaleedka – oo ah halis cimilada gu'ga ee Bartamaha Ohio – si adiga iyo qoyskaaguba aad u bedbaaddaan

- Gurmadyada barafka waxaa ku dhawaaqa Sheriff-ka Degmada Franklin oo soo dhejiya heerka barafka xaaladda degdegga ah sababay oo ay weheliso faahfaahin heerarka baraf ee kala duwan ah, halkaanaa lagu soo dhigaa **http://www.sheriff.franklin.oh.us/** (bidix hoose ku dhigan).
- Si taxaddar leh u wad gaariga. Xitaa waddooyinka u muuqda kuwo qallalan waxay noqon karaan halis – cad baraf ahaa kaa lumen kara gacan ku haynta gaariga.
- Sii qorshayso safarrada waddada, oo ku darso eegmada saadaasha hawada maalintaad qorshaynaysid in aad baxdo.
- Wadne-istaagyada ayaa ah sababta u badan oo geerida keenta inta lagu jiro duufaan-jiilaaleedka am aka dib. Haddii xaaqidda barafka aanay muhiim ahayn, ha samayn, haddaad ku khasban tahayna u kala naso.
- Dhawr lakab oo dhar ah ku lebbiso haddaad waqti door ah bannaanka ku maqnaanaysid.
- Marna gurigaaga ha uga tegin dab ama kululeeye koranto ama gaas ku shaqeeya iyadoon lala joogin – dhamaan gurigay dab ku qaban karaan.
- Gaarigaaga ku dhex hayso guntin gurmad, hana ku jireen buste, toosh, biyo cabbitaan, isnaag, iyo calaamad ama calan qaylo-dhaansi.

**Si aad xog badan uga heshid u diyaarsanaanta duufaan-jiilaaleedyada, booqo:**

- Xarumah Xakamaynta Cudurrada (Centers for Disease Control): **http://emergency.cdc.gov/disasters/winter/faq.asp**
- FEMA: **http://www.fema.gov/hazard/winter/index.shtm**
- Ohio Committee for Severe Weather Awareness: **http://www.weathersafety.ohio.gov/** (Guddiga Ohio ee Wargelinta Cimilada Ba'an)

Maaraynta Gurmadka iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin, oo ah hay'ad dawli ah oo maxalli ah, waxay agaasintaa qorshaynta, tacliiminta, digniinta, waxqabadka iyo ka kabashada gurmad/musiibo ee degmadan oo dhan si ay u yarayso raadreebka xun ee ku iman kara dadka deggan meeshan iyo hantidooda

**Waxaa bixiyey deeq 2008 UASI waxaana la cusboonaysiiyey Oktoobar 2010**

**Xog Bulsho oo Gurmad oo ka Timid: (Emergency Public Information From:)**
Franklin County Emergency Management and Homeland Security
5300 Strawberry Farms Blvd., Columbus, Ohio 43230
Phone 614-794-0213, Fax 614-882-3209
Email **fcem&hs@franklincountyohio.gov**
On the Web at **www.franklincountyohio.gov/emahs/**